

Siyaasadda JKC - Marka Shaqaalaha Adeegsadaan Faragelinta Jirka ama Xoogga / Dishibiliinka Ardayga

Waxaa lagu dabaqi doonaa heerarka soo socda marka shaqaalaha dugsiga dagmada ku hawlan yahiiin hirgelinta dishibiliinka ardayga ama marka ay ardayga ku fulliyaan faragelinta jirka:

A. Waa mamnuuc ciqaabta jirka, tusaale ahaan, garaaca, dharbaaxyada dabada, farafareynta ama qanjaruufta, loo geysto dabeecad xumada ardayga.

B. Shaqaalaha dugsiga dagmada wuxuu adeegsan karaa faragelinta jirka taasoo loo baahan yahay in ay ahaato ciqaab macquul ah oo ku habboon hadba sida loogu baahdo si:

1. ardayga looga celiyo dabeecad xumada halista ah;
2. loola wareego hub ama shay halis ah;
3. loo difaaco naftiisa ama nafteeda;
4. si qofka looga badbaadiyo waxyeelo; ama
5. looga hortago khasaarada loo geysto hantida

Shaqaalaha dugsiga dagmada ee mas'uulka ka ah hirgelinta siyaasadaan waxay sidaas ku sameyaan takoor la'aan ku saleysan isirka, qofka waxay uu yahay lab ama dhedig, asal qaran, jinsiyadda, diinta, itaal darrida ama kacsiga qofka doono ama aqoonsiga waxa uu qofka yahay lab ama dhedig.

Siyaasadaan waxaa hirgelin doono xubnaha shaqaalaha dugsiga dagmada iyadoo la adeegsanaayo garasho aqoon leh, lana tixgeliyo ammaanka, maslaxadda, iyo sharafta xubnaha bulshada dugsiga.

La Qaatay: Janaayo 15, 2009